

## Racfaan ka qaadashada ka joojinta dugsiga ama cayrinta Warqada xaqiiqda waalidka/xannaaneeyaha

### Waa maxay racfaanku?

Racfaanku waa markaad weydiisato in go'aanka mar labaad dib loo eego. Tan ayaa dhacda sababtoo ah kumaad faraxsanid go'aankii la gaaray.

### Sidee baan racfaan uga qaataa dugsi ka joojin ama ka cayrin?

Racfaan ayaad ka qaadan kartaa ka joojinta ama ka cayrinta haddii aad rumeysan tahay in maamuluhu uu sameeyey go'aan aan cadaalad ahayn ama aan raacin nidaam sax ah. Ardayda, waalidiinta iyo xannaaneeyayaashu waxay buuxin karaan [foom racfaanka](#).

Racfaanada waxaa lagu xareyn karaa [Xafiiska Waxbarashada](#) degaanka. Xafiiska Waxbarashada degaanka ayaa kaa caawin kara inaad fahamtid nidaamka. Waxay sidoo kale kaa caawin karaan qoritaanka racfaanka. Dugsiga ilmahaaga ayaa kuu siin kara macluumaadka xiriirka ee degaanka Xafiiska Waxbarashada.

Hal racfaan oo kaliya ayaa laga qaadan karaa go'aan kasta. Go'aanka ku saabsan racfaanka waxaa sameyn doona Agaasimaha, Hogaanka Waxbarashada ama Agaasimaha Fulinta, Waxqabadka Dugsiga wuxuu qaadan doonaa inta u dhaxeyna 15 iyo 20 maalmood oo dugsi in wax laga qabto. Waa lagula soo xiriiri doonaa marka racfaanka la xareeyo oo go'aan laga gaaro. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Waxbarashada degaanka meeshii racfaanka lagu xareeyey.

### Natiijada racfaanka dugsi ka joojinta

Haddii racfaanka ku saabsan ka joojinta dugsiga la waafaqo, iyo in go'aanka qofka gaarayaa uu ogolaado codsigaaga, maamulaha ayaa kula soo xiriiri doona si uu u hubiyo in ilmahaagu uu ugu soo noqdo dugsiga sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah. Go'aanka racfaanka waxaa lagu qori doonaa diiwaanka ilmahaaga ka joojintana waa laga saari doonaa diiwaanka ilmahaaga.

Haddii racfaanka ku saabsan dugsi ka joojinta aan la taageerin, go'aanka qofka gaarayaa ma ogolaan codsigaaga, ilmahaagu wuxuu ku sii jiri doonaa dugsi ka joojinta ilaa taariikhdiisii laysku raacay.

### Natiijada racfaanka cayrinta

Haddii racfaanka ku saabsan cayrinta la taageero, qofka go'aanka gaarayaa uu ogolaado codsigaaga, maamuluhu wuxuu u baahan doonaa inuu kula shaqeeyo si loo xaliyo walaaca darran ee amaanka iyo in meel la dhigo tallaabooyin taageero ah si ilmahaagu uu dugsiga ugu noqon karo. Go'aanka racfaanka waxaa lagu qori doonaa diiwaanka ilmahaaga iyo cayrintana waa laga saari doonaa diiwaanka ilmahaaga.

Haddii racfaanka ku saabsan cayrinta aan la taageein, oo uusan qofka go'aanka gaarayaa ogolaan codsigaaga waxaa laga yaabaa inay jiraan fursado badan oo kale oo uu ilmahaagu helayo. Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa in la gaaro go'aan lagu meelaynayo ilmahaaga dugsi kale ama meel kale oo ku haboon baahida ilmahaaga. Maamulaha ayaa kula shaqeyn doona haddii ay tani dhacdo.

Haddii racfaanka ku saabsan cayrinta aan la taageerin oo uu ilmahaagu ka weyn yahay 17 sanno jir, adiga iyo ilmahaagu waa inaad raadisaa fursadaha aad ku sii wadanaysid waxbarashada ama shaqo aad ugu gudbeysid.

### Sidee baan cabasho u sameeyaa?

Macluumaadka ku saabsan [u doodista ilmahaaga](#) waa helayaan waadliidiintu. Macluumaadka ku saabsan [cabasho sameynta](#) ayaa sidoo kale la helayaa haddii aad weli ka walaacsan tahay wixii ku saabsan nidaamka racfaanka ee ka joojinta ama ka cayrinta dugsiga.

Macluumaadka aad kula xiriiraysid dugsiyada waxaa lagugu siiyey [Xeerka Bulshada Dugsiga](#).

### Adeega turjumaanka taleefanka

Haddii aad dooneysid inaad la xiriirtid dugsiga oo aad caawimaad uga baahan tahay Ingiriiska fadlan ka wac adeega turjumaanka taleefanka 131 450, u sheeg luuqadaad u baahan tahay oo weydii xiriiriyaha inuu waco dugsiga. Xiriiriyaha ayaa turjumaan khadka soo gelin doona kaa caawiya wada hadalkaaga. Adeegan lacag lagaama qaadi doono.